# Goorma ayaa shaqada la iga ceyrin karaa? “Shaqaaleyn leh doorasho madax banaan”

When Can I Be Fired? “At-Will Employment”

## Waa maxay shaqaalaysiinta ikhtiyaarka ahi?

Loo shaqeeyaha marka uu doono ayuu shaqada kaa saari karaa **sabab kasta oo uu doono** adiguna shaqada waad ka tagi kartaa markii aad doonto. Taas waxaa lagu magaacaabaa “Shaqaaleyn leh doorasho madax banana.” **Laakiin waxaa jira xaalado ka baxsan sharciga doorashada madaxa banaan.**

## Heyb Sooc

Waa arrin aan sharciga waafaqsaneyn in qofka shaqada looga saaro heyb sooc aan sharci aheyn. Waa sharci daro in loo shaqeeye shaqada kaaga saaro heyb sooc sharci daro ah oo ku saleysan:

- Da’da
- Xaaladda guurka *(soolane, xaas ah, la soo furay, kala bixid, ama laga dhintay)*
- Xaaladda qoyska  *(caruur aad leedahay ama aad uur leedahay*)
- Jinsiga
- Doorashada jinsiga ee qofka
- Aqoonsiga jinsiga
- Qowmiyadaada *(oo ay ku jirto timo-jarka caadiga ah)*
- Midabka
- Gargaarka dadweynaha oo uu qaato.
- Naafanimada
- Diinta
- Waxyaabaha qofku aaminsan yahay
- Xubin ka ah gudiga xuquuqda aadanaha
- Halka qofku asal ahaan kasoo jeedo.



Akhri warqadda xogta urursan ee *Takoorida iyo Khashkhashaadaha Goobta Shaqada*.

## Xuquuqda heshiiska shaqada

Haddii uu jiro heshiis aad kala saxiixateen, loo shaqeeyaha shaqada kaama saari karo haddii aadan jabin heshiiska. Heshiiska aad wada gashaan waxa uu noqon karaa:

- Heshiiska shaqada
- Heshiiska aad hadal ahaan u gaartaan
- Waraaq shaqada laguugu soo bandhigo
- Heshiis aad si wadajir ah ugu gaartaan gorgortanka ururada shaqaalaha

Xitaa haddii aad heysato mid ka mid ah kuwa kor ku xusan, ma aha micnaheedu in loo shaqeeyaha aanu **marna** kaa eryi karin shaqada. Inta badan, heshiiska shaqada ama buuga loo shaqeeyaha ayaa lagu cadeeyaa waxyaabaha shaqada lagaaga eryi karo iyo talaabooyinka uu qaadayo loo shaqeeyaha ka hor inta aanu shaqada kaa eryin. La tasho qareen haddii aadan hubin xuquuqdaada.

Haddii aad ka tirsan tahay ururada shaqaalaha, waxaa jira heshiis shaqo kaasoo lagu magacaabo heshiiska wadajir u gorgortanka. Kani waa heshiis dhex mara ururka shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha. Waxa ay loo shaqeeyaha waajib kaga dhigeysaa inuu soo bandhigo "sabab" shaqaalaha lagu ciqaabo ama looga eryo shaqada. Akhri heshiiska shaqada oo xiriir wakilka ururka ama horjoogaha.



## "Kashifaha jabinta sharciga" *(Whistle Blower)* inuu ka badbaado in aan laga aargoosan

Marar badan sharciga ayaa ilaaliya xuquuqdaada sharciga ah haddii shaqada lagaaga eryo in aad u istaagtay xuquuqdaada oo aad diiday in aad sharciga jabiso. Ma aha in lagugu ciqaabo ama laguu geysto handadaad haddii aad sidaas yeesho. Taas waxaa mararka qaarkood lagu magaacaa ilaalinta ama ka badbaadinta aargoosasho "kashifaha jabinta sharciga " Sharciga ayaa ilaalinaya xuquuqdaada haddii:

- Haddii aad soo sheegto jabinta sharciyada gobolka ama kuwa dawladda dhexe ee loo shaqeeyaha ama dawladda adiga oo u jeeda "si daacadnimo ah." Si daacadnimo ah waxaa loola jeedaa haddii aad aamisan tahay in warbixinta aad soo gudbisaa tahay mid run iyo sharci ah. Laakiin haddii ay shaqadaada tahay in aad soo gudbiso jabinta sharciga, waxaa surogal ah in aadan laheyn dacwad.

- Wixii cabasho ah ee la xiriira xuquuqdaada oo lagu xad gudbay la xiriir loo shaqeeyaha. Loo shaqeeyaha shaqada kaama eryi karo si uu kuu ciqaabo (kaaga aargoosto) marka aad ka hadashay xuquuqdaada shaqada. Waxa sharcigu kuu ogol yahay in aad soo gudbin karo cabasho liddi ku ah heyb sooc laguu geystay ama aad weydiisan karto fududeyn gaar ah haddii aad tahay hooyo nuujineysa ama qof naafo ah.

- Waa lagu wareystay taasoo qeyb ka ah baaritaanka heyb sooc ama qashqashaad lagu soo eedeeyey loo shaqeeyaha.

- Hay'adda dawladda ka tirsan ayaa laa codsatay in aad ka qeyb qaadato baaritaanka ama dhageysiga.

- Waxa aad diiday in aad sameyso waxyaabo sharci daro ah oo la xiriirta shaqada ama aad gaarsiisay loo shaqeeyaha.

Sharciyada arrimahaas la xiriira waa kuwo cakiran. La tasho qareen ama la soo xiriir Waaxda Shaqada Iyo Warshadaha ee Minnesota ee (651) 284-5005 ama 1-(800) 342-5354. Soo booqo www.dli.mn.gov/.

## Badbaadada Kale

Shaqada lagaagama eryi karo:

- Mushaharkaaga oo lagaa jaro ama in mushaharkaaga laga jaro lacagta daryeelka caruurta (Child support).

- Qaadato fasax sharcigu kuu ogol yahay. Sida fasaxa uureyda iyo waalidnimada, fasax caafimaad oo aad u qaadato, ilmahaaga, ama qof kale oo qaraabo ah, dagaal qoyska dhex mara, ama noocyada kale ee fasaxa. Haddii aad dooneyso in aad isticmaasho fasaxa, waa in aad ka talo gelisaa loo shaqeeyaha haddii laguu ogol yahay iyo hadii lacag lagugu siinayo mudaddaa iyada ah.

Akhri warqadda xogta urursan :

*Fasaxa Shaqada: Ciidaha Dhalashada, Korinta, Xafladaha Dugsiga*
*Fasaxa Shaqada: Dhimasho ama Geeri*
*Fasaxa Shaqada: Qoysaska Ciidamada*
*Xuquuqda Shaqada:Dhibnayaasha Rabshadaha iyo Qashqashaadda*

Haddii shaqada lagaa eryo ama aad ka tagto oo ay dhaceen mid ka mid ah waxyaabaha kor ku xusan, wargeli loo shaqeeyaha ama waaxda shaqaalaha si ay u ogaadaan waxa dhacay iyo in aysan aheyn. Haddii aanay qaadin wax talaabo oo ay ku saxayaan dhibaatada, waxa aad codsan kartaa lacagta la siiyo dadka shaqada la'aant ah. Akhri xogta urursan ee *Helida Lacagta Shaqaalaha Shaqo La'aanta ah la siiyo*. Waxaa suurogal ah in aad shaqadaada dib u soo ceshan karto ama waad ku dacweyn kartaa loo shaqeeyaha. La xiriir qareen aqoon u leh shaqaaleynta.



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**